Adigoo aan waxba tolin sameyso maro wejiga lagu daboosho

XUSUUSO WAXYAABAHAN:

- Marada wejiga lagu daboosho laguma beddelan karo kala-fogaanshaha dadka. Sida ugu fiican ee uu qof kasta u ilaalin karo naftiisa iyo dadka kale waa in guriga la joogo **#SaferAtHome**.
- Markaad marada wejiga iska fureyso ka taxaddar in aad iska taabato indhaha, sanka, iyo afka.
- Dhaq gacmahaaga isla marka aad marada iska furto.

HABKA T-SHIRT

Soo Qaado:
- T-Shirt
- Maqas

Waxaad Sameyneyso

1 Ka jar dhinaca hoose 7 ilaa 8 inji funaanadda t-shirt.



2 Dhinaca tolmada, ka jar 6 ilaa 7 inji oo afargees ah. Dabadeedna ka jar kor iyo hoos leynka tolmada si aad xargo uga hesho.



3 Isaga xir xargaha dhinaca luqunta ka dibna madaxa kore.



4 Mar kasta oo aad isticmaasho dhaqo marada wejiga.